

BADBAADINTA ABUURKA

WAA MAXAY SABABTA LOO BADBAADINAAYO ABUURKA


Ma ahan kaliya in badbaadinta abuurku uu yahay arrin wax dhaqaaleyn ah, laakiin sidoo kale waxay caawisaa sidii loo dhawri lahaa kala duwanaanshiyaha dalagga, adkaysiga bulshada, iyo muhiimadda dhaqanka ee geedaha. Kala duwanaanshiyaha noolaha ayaa caawiya nidaamka cunnada sidii uu ugu adkaysan lahaa xaaladaha adag ee deegaanka. Tani waxay noqon doontaa mid sii kordheysa oo muhiim ah maaddaama xaaladahan uu uga sii daro isbeddelka cimilada. Noocyada qaarkood ayaa laga yaabaa inay iska caabiyaan abaarta, qaar kalena waxay u adkeysan karaan dabaylo badan, iyo wixii la mid ah. TMarkasta oo ay bataan kala duwanaanshiyaha hidde-sideyaasha, hababka cunnada ee badan ayaa laga ilaaliyaa isbedbeddelka ba'an iyo yaraanta kheyraadka.

SIDA LOO BADBAADIYO ABUURKA

BARO GEEDAHAAGA: Wax ka baro tayooyinka dalagyada ee aad dooneyso inaad abuur ka badbaadsato. Dhirta sanadlaha ah, sida yaanyada, salarka, iyo digirta way ubxiyaan, waxay soo saaraan miro, wayna dhintaan xilli kasta. Geedaha labada sano noloshoodu tahay, sida karootada iyo basasha, way ubxiyaan oo soo saaraan miro labadii xilli kasta mar, taas oo macnaheedu yahay inaad sugto si aad u badbaadiso abuurkooda. Geedaha mudada dheer jira sida raspberries iyo blueberries, way ubxiyaan xilli kasta laakiin waxay noolaan karaan sannado badan. Qaangaarka miraha waa arrin kale oo muhiim ah. Abuurka qaar waxaa laga yaabaa in aanay ku bislaan waqtiga caadiga ah ee la isticmaalo miraha waxaana laga yaabaa in aad u baahato in aad sugto ilaa midhaha ay ka bislaadaan bislaansho xad dhaaf ah. Waxaad u isticmaali kartaa macluumaadkan si aad ugu habayso dhaqamada badbaadinta abuurkaaga iyo abuurka dhirta ee gaarka ah ee aad rabto inaad kaydsato.

QORSHAHA KAYDINTA ABUURKA: Tamaandhada, digirta, digirta pease, iyo salarku waxay ayaga qudhood alyacni mid waliba qudhiisu isku rimiyaan si sannadle ah. Dalagyadaan waa kuwa ugu fiican ee lagu bilaabo noqoshada badbaadiyeyaasha abuurka. Waa inaad sidoo kale qorsheyso inaad abuurto in abuur ah oo kusiin doona dalag xooggan xilliga soo socda, taasoo ay dalag ilaa dalag kale ku kala duwanaanayaan.

SOO URUURI ABUURKAAGA: Dalagyada ayaa khudaar qallalan leh ama khudaar qoyan. Ka badbaadinta abuurka khudaarta engegan waxaa laga yaabaa inay u baahato in la gooyo galalka miraha ee bislaaday iyo in loo habeeyo keydinta si ku habboon. Miraha qoyan waxay u baahan yihiin in laga saaro miraha bislaaday hilibka ama meesha buuran ee midhaha oo si buuxda loo qalajiyo.



SIDA LOO XAREEYO ABUURKA

Habdhaqannada wacan ee xareynta ama keydinta ayaa dheereyn kara nolosha abuurkaaga. Markii aad u diyaarinayso abuur keydin, hubi inay bislaadeen, cudur iyo cayayaana aysan lahayn, ayna qallalan yihiin. Intaa kadib calaamadee abuurkaaga oo magacooda ku qor oo diiwaangali wixii faahfaahin ah ee kale ee ku habboon. Ku xaree abuurka meel qaboow, oo mugdi ah oo qallalan oo aan cayayaan lahayn.



HABDHAQANNADA UGU WANAAGSAN

DIWAAN HAYN: Qoraallo faahfaahsan oo ku saabsan abuurka aad badbaadisay ayaa ah xog aad muhiim u ah oo ay tahay in lala xareeyo abuurka. Raadraac ku samee magaca geedka, inta abuur laga soo uruuriyay, taariikhda la abuuray, taariikhda ay bislaadeen abuurku, taariikhda lasoo gooyay abuurka, iyo wixii kale ee xog ah ee muhiim ah.

KA KAYDSO ABUUR DHIRTA UGU CAAFIMAAD BADAN: Dhirta caafimaadka qabta iyo tan adag waxay u badan tahay inay soo saaraan abuur caafimaad qaba. Inaad yara doorato markaad go'aansanayso dhirta aad ka ururinayso abuurka waxay faa'iido u yeelan kartaa adkeysiga muddada dheer ee dalagyadaada. Badbaadinta abuurka dhirta leh cabbirka saxda ah, midabka, iyo dhadhanka waxay sidoo kale kaa caawin kartaa hubinta in dalagyada sanadka soo socda ay dhaxli doonaan sifooyin wanaagsan.

KA FOGAADA IN GEEDO KALA DUWAN AY ISRIMIYAAN: Dalagyada kala duwan ee isku nooca ah ayaa midba midka kale rimir karaa, taas oo keenta in dhirtu yeelato astaamo ka duwan dhirtii markii hore dhashay iyaga. Haddii aad jeclaan lahayd inaad ka dhigto noocyada kala duwan ee dhirtaada saafi, markaa waxaad tixgelin kartaa inaad kasoo soocato dhirta isku nooc. Tani waxay ku lug leedahay in la fogeeyo inta u dhaxaysa dalagyada noocyo kala duwan oo isku nooc ah. Masaafada go'doominta way kala duwan tahay iyadoo lagu saleynayo dalagga gaarka ah. Tusaale ahaan, dalagyada rima ayadoo ay saacidayaan dabaysha ama cayayaanka (galleyda, qajaarka, bocor) waxay u baahan doonaan fogaan ka badan tan ay u baahan yihiin dalagyada isrimiya geed walba kaligii (yamaandhada, basbaaska, digirta).



GrowBoston

Ilaha: Seed Savers Exchange, Seeds Matter, University of Minnesota Extension, Civil Eats. Sawir Khiyaali ah oo ay Qortay Olivia Golden

growboston@boston.gov

